

# TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA NUKLEARKA KLIINIKADA MANKATO SKANKA HEPATOBILIARY (HIDA)

Hepatobiliary Scan (HIDA) - Somali

Bukaanka: \_\_\_\_\_

Taariikhda Ballanka: \_\_\_\_\_

Waqtiga Ballanka: \_\_\_\_\_ am/pm

Goobta: Waaxda Daweynta Nuklearka Kliinikada Mankato – Dabaqa Kowaad  
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

## Maxay tahay Skanka Lafta Jirka oo Idil?

Skanka Hepatobiliary, ama HIDA, waa daraasada sawirka daweynta nuklearka loo adeegsado in lagu baaro dhibatooyinka beerka, xamiitada, iyo tubooyinka beer yaraha. Waxaa la adeegsadda maadada sii daysa shucaaca raadiyaha, taasoo dabagasha socodka dhacaanka beer yaraha (dhacaan uu soo saaro beerka oo kaalmo u ah shiididda) laga bilaabo beerka ilaa gudaha xamiitada iyo mindhicirada yaryar. Daraasadda waxay kaalmo u tahay baarista cudurada iyo xaaladaha, sida cudurka xamiitada, waxyaabaha isku dadba socodka dhacaanka, cilladaha tubooyinka dhacaanka, iyo dhibaatooyinka kale ee lala kulmo, qaliinka kaddib. HIDA waxaa kaloo loo isticmaali karaa in lagu ogaado qadarka dhacaanka ka soo baxa xamiitada.

## Baarista Ka Hor

- **HA** cunin ama ha cabbin waxba, 4 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah qaadashada daawada, xanjada ama nacnaca adag.
- Ha qaadanin dawooyinka laga helo Morphine, 24 saac ka hor inta aadan gelin baarista.
- U sheeg bixiyahaada haddii aad naas nuujisid, haddii aad tahay xaamilo ama aad u maleysid in aad xaamilo noqon doontid.
- Waxaa dhici karto in aad u baahatid in lagu siiyo daawo (Morphine) inta ay socoto baarista, si loo arko xamiitadaada. Fadlan qorsheyso in aad haysatid qof ku qaada haddii loo baahdo in lagu siiyo daawadaan bacdamaa aadan awood u lahaan doonin in aad waddid baabuur ilaa guriga. Farsameyaqaanka Daweynta Nuklearka ma ogsoona haddii loo baahan yahay daawada ilaa laga bilaabo baarista. Waad wadan kartaa baabuurkaada ilaa guriga haddii aadan u baahanin in lagu siiyo Morphine.

## Inta ay Socoto Baarista:

- Farsameyaqaanka wuxuu bilaabi doonaa in uu kaa mudo xiddidka (IV) gacantaada kore ama gacanta.
- IVga waxaa la soo raacin doonaa maado sii daysa shucaaca raadiyaha.
- Waxaad u seexan doontaa dhabarka adiga oo ku seexda miiska sawirka.
- Waxaad u baahan tahay in aad seexatid aadna dhaqaqin waqtiga sawirka.
- Waxaa sawiro laga qaadi doonaa calooshaada, waxaana loo adeegsan doonaa kaamera khaas ah ilaa 60 daqiiqo.
- Waxaa IVga la soo raacin doonaa daawo kale, oo lagu magacaabo Kinevac.
- Waxaa la qaadi doonaa sawirada muddo 30 daqiiqo kale inta aad ku sugan tahay seexashada, adiga oo aan dhaqaqin.
- Baarista waxay qaadataa 90 daqiiqo.

## Baarista Kaddib:

- Farsameyaqaanka ayaa kaa saari doono IVga.
- Waxaad ku soo noqon kartaa hawlahaada caadiga.
- Xafiiska bixiyahaada ayaa kaala soo xariiri doono natijada baarista.

Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe marka aad timaadid.

Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigatid ama joojisid ballanka, ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan baaristaan, fadlan wac 507-385-3955.